


U-Socdaalidda Australia

Dokumantiyada iyo aqoonsiga

Ku-hayso dokumantiyadaada iyo aqoonsigaaga diyaaradda shandaddaada aad shaqsi ahaan u-sidato markii aad safrayso. Dokumantiyadan waxay kugu caawin doonaan inaad ka samayso nolol cusub Australia sidaas darteed waxaa muhiim ah inaad ku haysato meel ammaan ah aadna sidato mar kasta.

Haddii lagu siiyey ImmiCard ama Dokumantiga U-socdaalka Australia (Document for Travel to Australia - DFTTA) waxay xaqiijinaysaa fiisadaada waxaana loo adeegsan doonaa inay yihiin dokumantigaagii safarka aad ku aadi lahayd Australia.

Waa inaad ku saxiixdaa guddiga saxiixiisa wejiga hore ImmiCard isla markii aad hesho. Carruurta ka yar 10 sano maahan inay saxiixaan. Waa inaad la timaaddaa ImmiCard ama DFTTA madaarka ama ma awoodi doontid inaad safarto.



Nooca Baagga

Waxaa jira laba nooc oo baaggag/shanddad ah oo dadku badanaa u-adeegsadaan safarka diyaaradda: Baaggaga 'la-sito' (waxaa kaloo loo yaqaan 'shandadda gacanta') iyo baaggaga 'la-baaro' ama suitcases-ka.

Waxaad u qaadan kartaa hal baag oo yar diyaaradda oo shandadda la qaato ah. Waxaad u baahan tahay inaad la socoto xanibaadda khuseysa waxaad ku qaadan karto diyaaradda.

Shandaadda baarista waxay aadaysaa qaybta cafashka ee diyaaraada. Waxaa lagu dul-qorayaa magacaaga iyo meeshaad u-socoto waxaadna ka qaadan kartaa mar labaad markii aad timaado Australia. Waxaa lagu siin doonaa risiidhka bag kasta oo aad keento.

Diyaarad kastaa waxay leedahay xadidnaanta miisaanka ee cafashka la-qaadanaayo oo ah 20kg qofkii safrayaba. Haddii aad qabto wax ka badan xadkii miisaanka diyaaradda waxaa lagaa qaadi doonaa qarash dheeraad ah. Haddii aad wadato waxyaalaha waaweyn oo kale oo aad doonayso inaad qaadato, tusaale kaarbidyada, la-hadal qofka kugu caawinaya safarkaaga. Waxaad u baahan doontaa inaad si gaar ah u-bixiso waxyaalahaas waaweyn.

Haddij aad sidato shandad *waa inaad* ku ridataa...

- Dokumantiyadaada muhiimka ah, sida dokumantiyada socdaalka
- Waxyaalaha aad leedahay oo qiimaha leh, tusaale, dahabkaaga
- Waxyaalaha daryeelka shaqsi ah oo aad doonayso inaad ku isticmaasho diyaaradda dusheeda – hase ahaatee dureeruhu waa inuu dhalooyin ku jiraa kana yar yahay 100ml.

Ikhtihaar

- Waxyalaha shaqsigaa ee yaryar sida buugga la aqrisanayo, taleefankaaga, ama jaakadda la xiran yahay si aad isku-diiriso.

Baagga la baarayo waa inaad ku soo ridataa

- Dharka kugu habboon adiga iyo qoyskaaga – dharka loo gashan karo cimilada diirran iyo tan qabow
- Kabaha raaxada leh
- Waxyaalaha daryeelka shaqsiga ah sida shaambada, saabuunta ama carfiyeyaasha
- Daawooyinka aad u baahan karto ka dib markaad timaaddo Australia.

Ikhtihaar

- Waxyaalaha yaryar oo xusuus shaqsiyeedka ah sida sawirada, warqadaha iyo buuggagta (oo ay ku jiraan xidhmada AUSCO).

Baagga AAN la ogolayn

Australia waxay leedahay sharciyo adag oo ku saabsan **waxaadan** keeni karin waddan kan.

HAKU SOO-ridin shandadda aad sidato ama baaggaaga la-baarayo mid kasta oo waxyaalahan ah...

- Waxyaalaha beeraha ka yimaada sida dhirta, ubaxa, ciidda, iniinaha, lowska ama tubaakada aan la-warshadayn
- Xayawaanka nool ama waxyaalaha xayawaanka ka yimaada sida waxyaalaha kasta oo ay ku jiraan haragga, baalasha, dhogorta, lafaha, bacoosha, qararka, waxyaalaha shinnida ka yimaada ama qalabka xawawaanka ee la adeegsaday
- Cuntada ay ka midka yihiin waxyaalaha caanaha laga soosaaro, waxyaalaha ukunta ka yimaada, furuudka iyo qudaarta fareeshka/barafaysan ah
- Wixii hilib ah ama waxyaalaha hilibka ka yimaada
- Bundukha, waxyaalaha qarxa, ama damaashaadka-dabka ah
- Hubka oo ay ku jiraan mindiyaha, seefaha ama bundukhyada
- Daroogooyinka sharci-darada ah.

Haddii aad keento waxyaalahaas waddanka oo aad ku fashilanto inaad sii-sheegto waa lagu ganaaxayaa, dambi laguugu qaadayaa waxaadna qatar ku-gelaysaa 10 sano xabsi ah iyo inaad yeelato diiwaan dambiyeed.

Safarka diyaaradda

Safarka Australia waa mid dheer, sidaas darteed waa inaad isu-diyaarisaa safarkaas dheer. Mararka qaarkood safarku waa duulimaad dheer ah mararka qaarna waxaa jira joogsiyo loo sii maro Australia halkaas oo lagaa doonayo inaad diyaaradda ka baxdo.

Safarka ka-hor

Socdaalku waa mid daal badan ku ah cid kasta wuxuuna ku sii adkaan karaa carruurta yaryar. Ka hor intaadan bilaabin safarkaaga waa inaad hubisaa in carruurta wax soo cuntay musqushana ay galeen haddii loo baahdo. Safarka dhaadheer, waxaad u baahan doontaa inaad wax cunto aadna gasho musqusha diyaaradda. Iska hubi inaad u-wadato naabiyada iyo dharka dheeraadka ah cunugyada iyo carruurta yaryar.

Diyaaradda dhexdeeda

Waad ku dhexdhaqaaqi kartaa diyaaradda dhexdeeda haddii calaamadda suunku ay furan tahay. Haddii calaamaddu xiran tahay, waa inaad ku fadhidaa kursigaaga ayadoo uu suunka-kursigu kuu xiran yahay.

Waxaa lagu keeni doonaa cuntooyin iyo cabitaano ay ku jiraan casiirka iyo biyaha kuwaasina waa lacag la'aan. Mindida, fargeetada iyo qaaddada balaastiga ah ayaa laguugu siin doonaa cuntooyinka oo dhan.

Haddii aadan cuni karin cuntada lagu siiyey, waxaad ka codsan kartaa furuudka. Waa inaad uga tagtaa dhammaan cuntada soo-harta diyaaradda sababtoo ah laguuma ogola inaad usoo qaadata karantiilka Australia.

Laguuma ogola inaad sigaarka ku cabto dayuuradda dhexdeeda.



Cadaadiska hawada ee diyaaradda dhexdeeda wuxuu ukeeni karaa in dhagahaagu ay awdmaan. Liqidda, calalinta iyo hamaansiga ayaa kaa dejin kara cadaadiska dhagahaaga kaa haya. Nuujinta cunugaaga ka hor iyo inta lagu jiro diyaarad-kaca iyo degidda ayaa u samayn karta inay wax liqaan waxayna taas ku caawin doontaa inay ka dejiiso cadaadiska dhagahahooda ka haya.

Dhaqdhaqaaqa diyaaradda wuxuu u-keeni karaa dadka qaarkiis inay xannuun dareemaan. Haddii aad u-malaynayso inaad ku xanuunsanayso waxaa jira baaggaga warqadda ah oo ku jira jeebka kursiga oo loogu talagalay adigu inaad isticmaasho ama waxaad adeegsan kartaa musqusha diyaaradda.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg:

- www.homeaffairs.gov.au/Trav/Ente
- www.agriculture.gov.au/travelling

Taraansidka

Ka hor intaadan gaarin Australia, diyaaraddu waxay istaagi kartaa hal waddan ama wax ka badan waqti kooban si loo nadiifiyo ama shidaal loo siiyo. Taasna waxaa loo yaqaan joogsiga **taraansidka** ah. Inta lagu jiro joogsiga, waxaa lagaa codsan doonaa inaad ka degato diyaaradda. Qaado shanddadaada gacanta. Waxaa suurtagal ah inaad u baahan doonto inaad ku baddelato diyaarad kale, waxaadna u baahan kartaa inaad u lugayso qayb kale oo madaarka ah. Duulimaadka ku-xigaa waxaa loo yaqaan **duulimaadka isku-xirka**.

Qof ka socda Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka (International Organization for Migration - IOM) ayaa kugula kulmaya joogsiga taraansidka si uu kuu caawiyo. Haddii ay halkaas kaa waayaan aadna wareerto, weydii shaqaalaha diyaaradda si ay kaaga caawiyaan inaad hesho halka aad doonaysid inaad aado si aad u sugto duulimaadka xiga. Taasna waxaa loo yaqaan albaabka bixitaanka. Waxaa jira xaruumaha macluumaadka iyo kowntarada diyaaradda oo madaarka oo dhan ka jira oo ay joogaan dad kugu caawin kara inaad hesho dariiqaaga.

Digniin: marna haka tegin madaarka intaad taraansidka ku jirto in qof ka socda IOM kula socdo maahee.

Imaanshaha Australia

Soo-dhexmaridda kastamka

Markii aad ka degto diyaaradda, waxaad dhexmaraysaa sii-daynta socdaalka. Shaqaalaha Ciidanka Xuduudda Australia (Australian Border Force - ABF) ayaa baari doona dokumantigaaga socdaalka si ay kuu siiyaan sii-daynta si aad u-gasho waddanka.

Waxaad u baahan doontaa inaad siiso qofka fadhiya miiskan:

- Dokumantigaaga DFTTA ama ImmiCard-kaaga
- Kaarkaaga rakaabka imaanaya
- Haddii aad wadato baasaboora ama titre de voyage', waa inaad halkan keentaa.

Sarkaalka ABF wuxuu hubin doonaa dokumantigan dib ayuuna kuu siin doonaa.

Incoming passenger card • Australia		PLEASE X AND ANSWER EVERY QUESTION – IF UNSURE, Yes X	
PLEASE COMPLETE IN ENGLISH WITH A BLUE OR BLACK PEN		▶ Are you bringing into Australia:	
▶ Family/surname		1. Goods that may be prohibited or subject to restrictions, such as medicines, steroids, illegal pornography, firearms, weapons or illicit drugs?	Yes ☐ No ☐
▶ Given names		2. More than 2250mL of alcoholic beverages or 50 cigarettes or 50g of tobacco products?	Yes ☐ No ☐
▶ Passport number		3. Goods obtained overseas or purchased duty and/or tax free in Australia with a combined total price of more than AUD\$900, including gifts?	Yes ☐ No ☐
▶ Flight number or name of ship		4. Goods/samples for business/commercial use?	Yes ☐ No ☐
▶ Intended address in Australia		5. AUD\$10,000 or more in Australian or foreign currency equivalent?	Yes ☐ No ☐
	State	Note: If a customs or police officer asks, you must report travellers cheques, cheques, money orders or other bearer negotiable instruments of any amount.	
▶ Do you intend to live in Australia for the next 12 months?	Yes ☐ No ☐	6. Meat, poultry, fish, seafood, eggs, dairy, fruit, vegetables?	Yes ☐ No ☐
▶ If you are NOT an Australian citizen:		7. Grains, seeds, bulbs, straw, nuts, plants, parts of plants, traditional medicines or herbs, wooden articles?	Yes ☐ No ☐
Do you have tuberculosis?	Yes ☐ No ☐	8. Animals, parts of animals, animal products including equipment, pet food, eggs, biologicals, specimens, birds, fish, insects, shells, bee products?	Yes ☐ No ☐
Do you have any criminal conviction/s?	Yes ☐ No ☐	9. Soil, items with soil attached or used in freshwater areas e.g. sports/recreational equipment, shoes?	Yes ☐ No ☐
		▶ 10. Have you been in contact with farms, farm animals, wilderness areas or freshwater streams/lakes etc in the past 30 days?	Yes ☐ No ☐
		▶ 11. Were you in Africa, South/Central America or the Caribbean in the last 6 days?	Yes ☐ No ☐
DECLARATION The information I have given is true, correct and complete. I understand failure to answer any questions may have serious consequences.		YOUR SIGNATURE Day Month Year	
		TURN OVER THE CARD English	

Qaadashada baaggaaga

Marka lagu sii-daayo gelitaanka Australia, waxaad u baahan doontaa inaad baaggaaga ka qaadato meesha carousel-ka boorsooyinka.

Badanaa lambarka duulimaadka ee diyaaradda aad ku soo safartay waxaa lagu muujin doonaa carousel-ka boorsooyinka kaas oo ay saaran yihiin boorsooyinkaagii. Calaamaddu waxay u e'kaan kartaa kan hoose oo kale.



Haddii aad weydo baaggaagii, weydiiso sarkaalka madaarka wixii caawimaad ah. 'Fadlan ma igu caawin kartaa inaan helo baagaygii?' 'Can you please help me find my baggage?' waxaa muhiim ah inaad haysato risiidhada baaggaaga maaddaama ay saraakiisha ka caawinayso si ay u helaan baaggaaga.

Maridda karantiinka

Ka dib markii aad soo-qaadato baaggaaga, waxaad u baahan doontaa inaad soo-qaadato baaggaaga adoo soo-dhex-maraya barta-baaridda ABF iyo Wasaaradda Khayraadka Beeraha iyo Waraabka (Department of Agriculture and Water Resources).

Raac calaamadaha ama raac dadka u socda barta-baarista. Sarkaal ayaa kaa qaadi doona kaarkaaga rakaabka imaanaya wuuna haysanayaa.

Saraakiishu waxay baari doonaan baaggaaga si loo ogaado inaad wadan wax bundukhyo ah, mindiyo, dhir, waxyaalaha cuntada ah, daroogooyinka sharci-darrada ah ama waxyaalaha sharci-darrada ah. Eeyada tababaran 'Sniffer Dogs' ayaa kaloo loo edeegsadaa inay dadka iyo baaggaaga baaraan markay yimaadaan. Waxaa muhiim ah in Australia ay wax kasta samayso oo ay iskaga ilaalin karto cayayaanka halistaa iyo cudurada kuwaas oo waxyeellayn kara beeraha qiimaha badan iyo ganacsiga dalxiiska.

Haddii saraakiishu ay ku weydiyaan wax su'aalo ah, uga jawaab si daacad ah oo furan. Haddii aad u baahato caawimaad xagga luqadda, weydiiso turjumaan. Waxaad tiraahdaa: cid ma i-caawin kartaa – kuma hadlo wax Ingiriisi ah. 'Can someone help me - I don't speak much English'.

Qaybta dib loo eegay (April 2018)



Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee
Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda
Australia ee Adeegyada Bulshada

